IIBMAGALO

# FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

## EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 17aad Muqdisho 1da Abriil 1989 L. 4

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar walba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

QTYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 21 ee 9 Maarso 1989, Magacaabid Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee C.Q.S., Bog; 182

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA, L. 3 ee 10 Feb. 1989, Aqoonsi Urur Samafalka Ugbaad, SPVO. Bog; 178

QAYBTA SAD/XADD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

DAWLADDA HOOSE MUQ. 4.3.89, Naado Dhul J.le Cabdiraxmaan Xuseen Jibriil L. 75 Bog; 179

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.3.89, Lumid Buug Kayd L. 8818 ku qoran Saxaa Carab Maxam L. 78 » 182

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.3.89, Lumid Buug Kayd L. 4342 ku qoran Faaduma Ibrhim Cali L. 79 » 183

MAXKAMADDA G. BANAADIR. 13.3.89, Lumid J.W. L. 0283326 ku qoran Aamina Xandulle Faarax L. 80 » 184

MAXKAMADDA G. BANAADIR 31.3.89, Lumid J.W. L. 0843020 ku qoran Nuur Maxamed Cali L. 81 » 185

XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO, Dhismo Shirkaadda la gacagbaxday — Energy Development ... iyo Xeer Gaar ah L. 82 » 186

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.4.89, Lumid Jeeg war. L. 0796935 ku qoran Xasan Xaaji Faarax L. 81/bis. » 187

MAXKAMADDA G. BANAADIR 25.3.89 Lumid Jeeg War. L. 0342126 ku qoran Cawoow Maxamed Nuur L. 83 » 188

MAXKAMADDA G. BANAADIR 31.3.89 Lumid Jeeg War. L. 0322852 ku qoran Maxamed Axmed Yuusuf L. 84 » 189

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.4.89 Lumid Jeeg War. L. 0646020 ku qoran Ruqiyo Axmed Geyre L. 85 » 190

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.4.89 Lumid 4 Jeeg ku qoran Cabdullaahi Cumar Maxamed » 191

Og. FAAFINTAAN RASMI AHAAN waxay soo baxday 9.5.1989

## QAYBTA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 21 ee 9 Maarso 1989, Magacaabid, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee C.Q.S.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya;

MARKUU ARKAY: Sharciga 3aad ee 3 Juunyo 1962 Maamulka Dawladda;

MARKUU ARKAY: Sharciga 6da Abriil 1960 Lr. 15aad Dhismaha X.D.S;

HADDUU TIXGELIYEY: Soo jeedinta Taliyaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed;

WUXUU XEERIYEY

Laga bilaabo 15.3.1989 G/LE SARE DR. CALI AADAN XASAN, asagoo ka tirsan Maxkamadda Sare Siidammada Qalabka Sida, waxaan si rasmi ah ugu magacaabay «Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qalabka Sida.

Waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 9.3.1989

— SARREEYE GAAS —
MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 3, ee 10ka Feb. 1989, Aqoonsi Ururka Samafalka Ugbaad, SPVO.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed Lr. 37 ee 2.6.73;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay Abuuris Ururro la nooc ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa si rasmi ah loo aqoonsaday Ururka Ugbaad SPVO, oo Urur Samafal ah ujeedadiisuna tahay inuu gacan ka geysto kuna taageero bulshooyinka Soomaaliyeed ee ku nool Miyi iyo Magaalaba Mashaariicda iyo Barnaamijyada Horumarineed siiba dhinacyada Waxbarashada, Caafimaadka, Beeraha, Dakhli-dhalinta, Xirfad ku tababaridda iyo Dhawrista Degaanka.

Qod. 2aad

Ururka wuxuu sa ldhiggiisu noqonaya Muqdisho, wuxuuna laamo ku yeelanayaa qaar ka mid ah degmooyinka iyo gobollada dalka.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqangalayaa marka uu saxeexo Wasiirka Arrimaha Gudwaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 10.2.1989

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(Dr. Maxamed Cabdulle Bacadle)

DAWLADDA HOOS EE XAMAR

WAAXDA MAAMULKA DHULKA RASMIGA AH

N A A D O   D H U L

Wax aala caddeynayaa in Jaalle Cabduraxmaan Xuseen Jibriil uu soo qortay Arjiga Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee ee Xamar,, maalintii taariikhdu ahayd 10.2.1987 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wadajir Qaabkiisu yahay Rettan-gol Addimihiisuna yihiin mt. 20 X 30 kuna fadhiya mq. 600/.

SOOHDIMIHIISU YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 319 Biis

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 315

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 325

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 4 Maarso 1989

AGAASIMAHA WAAXDA M. DHULKA RASMIGA AH
(Jaalle Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan)

L. 75

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdiraxmaan Jaamac Cali;

HADDUU TIXGELIYEY In uu lumay Jeeg War. Lam. 1245588 oo laga sameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed sida ku cad warqadda lam. 3160;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga lam. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1245588 kuna jirto lacag dhan Sh So. 100.000 kuna qoran magaca Maadow Isaaq Maxamed lagana sameeyey Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Cabdiraxmaan Jaamac Cali lacagta cadadeedu tahay Sh So 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 76

MAXKAMADDA GOBOLKA SANAAG

MGS/L.2/89 Ceerigaabo, 30.1.89

UJEEDO: Bedelaad Jeeg War. Lr. 06 7677 ee 25.6.88
Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Sanaag

MARKUU ARKAY:Codsiga T. 12.11.88, ee uu Maxkamaddaan u soo qortay Jaalle Maxamed Faarax Abokor, soona codsaday in loo baaliyo Jeeg ka lumay;

MARKUU ARKAY: Ogeysiiska B.G.&.K.S. Laanta Ceerigaabo, sida ku cad warqadda Sum. 00189 ee 12.11.88, taasoo ay ku cadahay inuu lumay J.W.L. 0667677, kuna qoreyd lacag dhan (30.000) Shilin iyo magaca Cabdullaahi Bootaan Maxamed, lana baafiyey 30.7.88, lacagta ku qorana uu lahaa Maxamed Faarax Abokor;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65, N.2 Lumid Jeeg War. Lam. 0667677.

WUXUU GO,AAMIYEY

In la cusboonaysiiyo Jeeg War. kor ku xusan, ka dib markii ay ka soo wareegto muddo dhan 30 maalmood, maalinta Dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Maxamed Faarax Abokor ama qof isaga ka sita wakaalad Sharci ah, iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

K/S. Guddoomiyaha Maxkamadda G. Sanaag
(Dr. Ch. Cabdullaahi Aadan Isaaq)

L. 77

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Saxan Carab Maxamuud Cumar;

HADDUU TIXGELIYEY: in uu lumay Buug Kayd Lam. 8818 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 105.000 ku qoran magaca Jaalle Saxan Carab Muxumed Cumar sida cad warqadda lam. 0171 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 8818 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 105.000 ku qoran magaca Jaalle Saxan Carab Muxumed Cumar.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir in ay siiso Jaalle Saxan Carab Muxumed Cumar lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 105.000 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.3.1989

(GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 78

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Faadumo Ibraahim Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 4342 oo laga sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed sida ku cad warqadda lam. ———

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 4342 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.343.34 kuna qoran magaca Faadumo Ibraahim Cali lagana sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Faadumo Ibraahim Cali lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 30.343.34 oo ah bedelkii Buug Kayd. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 79

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Xakiimo Xuseen Cadaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0265175 laga sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 145.000 kuna qoran magaca Xakiimo Xuseen Cadaan sida ku cad warqadda lam. 0786 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0265175 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 145.000 kuna qoran magaca Xakiimo Xuseen Cadaan lagana sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Xakiimo Xuseen Cadaan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 145.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 80

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Nuur Maxamed Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0843020 oo laga sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed sida ku cad warqadda lambar 3495;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0843020 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Nuur Maxamed Cali lagana sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Nuur Maxamed Cali lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 31.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 81

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cali Axmed Maxamed.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0796835 oo laga sameeyay L/Boosaaso ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed sida ku cad warqadda Lam. 3831.

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee sharciga Lr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0796835 kuna jirto Lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca Xasan Xaaji Faarax lagana sameeyay L/Boosaaso ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Boosaaso ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Cali Axmed Maxamed Lacagta cadadeedu tahay sh.so. 50.000 oo ah bedelkii J/War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.4.1989

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 81/bis

Reb. No. 1797

XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

DHISMO SHIRKAD LA MAGAC BAXDAY «ENERGY DEVELOUMENT ENGINEERING». — RAASUMAALKEEDU DHAN YAHAY Sh.So. 300.000/= (saddex boqol kun shillin Soomaali ah).

Muqdisho, maanta oo ayTaariikhdu tahay 19ka bisha Jannaayo — Sannadka kun sagaal boqol siddeetan iyo sagaal — 19.01.1989.

Aniga oo ah Dr. Maxamed Cumar Abati, Nootaayo Xamar ah, Xafiisna ku leh Daarta Uunlaaye Qolka Lamb. 11/B, ee Waddada Rooma, waxaa horteyda yimid ayaga oo heshiis ah Jaallayaasha kala ah:-

1) Maxamed Diiriye Laalac, ku dhashay Gaalkacyo 1984, leh Warqad Aqoonsi Lamb. 12367/D/H/Afgooye.

2) Maxamuud Jaamac Xasan, ku dhashay Gaalkacyo 1963, leh Warqad Aqoonsi Lamb. 289097/D/H/Muqdisho.

3) Cabdi Maxamuud Cumar, ku dhashay Garoowe 1944, leh Warqad Aqoonsi Lamb. 44130/D/H/Muqdisho.

4) Maxamed Saalax Xuseen, ku dhashay Garoowe 1941, degan Xamar.

5) Cali X. Madar, ku dhashay Hargaysa 1952, degan Xamar.

Jaallayaasha Magacyadooda kor ku qoran yihiin waxaa ka dhex dhismay Shirkad la magac baxday (ENERGY DEVELOPMENT ENGINEERING), iyagoo ka tanasulay kaalmo marqaatiyeed aniguna aan ku waafaqay, waxayna ku heshiiyeen **sidan:**

Qod. 1) Waxay dhexdooda ka dhisteen Shirkad la magacbaxday (ENERGY DEVELOPMENT ENGINEERING)

Qod. 2) Saldhigga Shirkadda waa Magaaladan Muqdishi, waxay Laamo iyo Xafiisyo kale ka furan kartaa Dalka gudihiisa.

Qod. 3) Ujeeddada Shirkadda waa:-

1. Sameyn baaris ku saabsan Suurta galka Deegaamaynta Xoogga Korontada ee Dalka Soomaaliya.

2. Samayn baaris ku saabsan suurta galka isku xiridda

deegaamaynta Xoogga Korontada ee Dalka Soomaaliya.

3. Samayn baaris ku saabsan suurta galka Dhisid Xarumo tabar dabeed yar-yar ee laga taago Daamanka Wabiyada JUBBA iyo SHABEELE.

4. Horumarinta tabarta Qoraxeed ee loo isticmaalayo socodsiinta Biyaha Waraabka iyo Dhalinta Xoogga Korontada ee Dalka Soomaaliya.

5. Horumarinta tabarta Xoogga Dabeysha oo loo isticmaalaayo socodsiinta Biyaha Waraabka iyo Dhalinta Xoogga Korontada ee Dalka Soomaaliya.

6. Naqshadeynta Mashaariicda tabarta iyo talo ka bixinta Arrimaha tabarta.

7. Rakibidda iyo hagaajinta qalabka tabarta.

Qod. 4) Maaliyadda Shirkadda, ee la caddeeyey waa Sh. So 300.000/— (saddex boqol kun), loona kala leeyahay sidatan:-

| | | |
|---|---|---|
| 1. Maxamed Diiriye Laalac | Sh.So. | 60 000/— |
| 2. Maxamuud Jaamac Xasan | Sh.So. | 60.000/— |
| 3. Cabdi Maxamuud Cumar | Sh.So. | 60.000/— |
| 4. Maxamed Saalax Xuseen | Sh.So. | 60 000/— |
| 5. Cali X. Madar | Sh.So. | 60.000/— |
| Isu Gayn | Sh.So. | 300.000/— |

Saamilayda Shirkadda waxay ku soo shubeen Bangiga Dhexe ee Soomaaliya. Curaar ah 3/10 oo dhan Sh So. 90 000 (Sagaashan kun). sida ku cad X/S. 1339—23 1.89. sida ku cad Dhigidda ku meel gaarka ah ee 3/10 oo laga qaado Shirkadaha la dhisaayo.

Qod 5) Shirkadda waxaa Maamulaya Guddoomiye oo loo doortay Jaalle Eng Maxamed Diiriye Laalac. wuxuu hayn doonaa Xilkaas illaa laga noqdo ama uuistiqaal ka keeno.

Eng Maxamuud Jaamac Xasan, waxaa loo doortay Maamule Idman.

— Cabdi Maxamuud Cumar Xubin
— Maxamed Saalax Xuseen Xubin
— Cali X. Madar Xubin

Qod 6) Guddoomiyaha Shirkadda wuxuu awood buuxda u leeyahay inuu fuliyo dhammaan Hawlaha Shirkadda oo

dhan kuna saabsan Hawlaha Caadiga iyo kan Caadi dhaafka an, sida Macaamiilaadka Bankiyada Hay'adaha Dowladda, Wasaaradaha, Wakaaladaha, iyo wixii la mid ah oo dani ugu jirto Hawlaha Shirkadda.

Maamulaha Idman wuxuu Awood u leeyahay inuu saxiixi karo Jeegagga, kana soo qaadi karo, kuna shubi karo Xisaabaadka ay leedahay Shirkadda, iyo inuu maamuli karo wax alaale wixii ku saabsan Maamulka Lacagta.

Qod. 7) Miisaaniyadda Shirkadda waxaa la xirayaa 31da Bisha Disembar ee Sannad walba.

Qod. 8) Shirkadda waxaa Saldhig u ah Xeergaarka Shirkadda ee ku lifaaqan Qoraalkan Dhismaha iyo Sharciyada kale ee Waddanka u degsan.

Qod. 9) Wax alla wixii aan halkan ku qornayn waxaa loo raacayaa sida uu qabo Sharciga J.D.S. ee u degsan Shirkadaha Noocan ah.

Qod. 10) Heshiiskaan sidaas ayaa lagu dhameystay, ka dib markey aqristeen waxa ku qoran oo dhan ayay halkaan hoose ila wada saxiixeen aqbal ahaan.

1. Maxamed Diiriye Laalac.
2. Maxamuud Jaamac Xasan
3. Cabdi Maxamuud Cumar.
4. Maxamed Saalax Xuseen
5. Cali X. Madar

Nootaayaha:- ( Dr. Maxamed Cumar Abati )

LIFAAQA «A»

XEER GAAR

MAGACA UJEEDADA XARUNTA MUDADA JIRITAANKA.

Qod. 1) Waxaa la dhisay Shirkad la magac baxday Shirkadda (ANERGY DAVELOPMEET ENGINEERIMO).

Qod. 2) Muddada Jiritaanka Shirkadda waa 30 Sano, Waana la sii cusboonaysiin karaa haddii shirweynaha Saamilayda oggolaado.

Qod. 3) Ujeeddada Shirkaddu waa:-

1. Sameyn baaris ku saabsan Suurta galka Deegaamaynta Xoogga Korontada ee Dalka Soomaaliya.

2 Samayn Baaris ku saabsan suurta galka isku xiridda Deegaamaynta Xoogga Korontada ee Dalka Soomaaliya.

3) Samayn Baaris ku saabsan suurto galka dhisid xarumo tabar dabeed yar yar ee laga taago Deegaanka Wabiyada Jubba iyo Shabeelle.

4) Horumarinta Tabarta Qoraxeed ee loo isticmaalayo Socodsiinta Biyaha Waraabka iyo dhalinta Xoogga Korontada ee Dalka Soomaaliya.

5) Horumarinta tabarta Xoogga Dabaysha oo loo isticmaalayo socodsiinta Biyaha Waraabka iyo Dhalinta Xoogga Korontada ee Dalka Soomaaliya.

6) Warshadaynta Mashaariicda Tabarta iyo tallo ka bixinta Arrimaha Tabarta.

7) Rakibidda iyo Hagaajinta Qalabka Tabarta.

Qod. 4) Maaliyadda Shirkadda waa Sh.So. 300.000/ (saddex boqol kun shillin Soomaali ah).

Qod. 5) Saamiyadu waxay yihiin kuwa la isku wareejin karo. Xubinta rabta inay ka baxdo shirkadda waxay qaybteeda u soo bandhigaysaa xubnaha kale. Haddii muddo hal bil Laga gadan waayo waxay ka iibinaysaa qofkii ay doonto oo kale.

Qod. 6) Shirka Shirkadda waxay yihiin kuwo caadi ah iyo kuwa caadi dhaaf ah. Shirkaas waxaa lagu qaban karaa xataa meel xarunta shirkadda ka baxsan, waxaase shardi ah inay tahay meel ka mid ah Dalka J.D.S. Go'aamada ka soo baxa shirkaa waxay xubnahu qasab ku yihiin inay raacaan kii joogay oo cod baxsaday ama kii maqnaada.

Qod. 7) Xarunta Shirkadda waxay ku taallaa magaalada Muqdisho, Shirkaddu waxay laamo iyo xafiisyo kale ku yeelan kartaa Dalka Gudihiisa.

Qod. 8) Mar alla markii ay maamulka la noqoto inay Shirkadda soo foodsaareen duruufo gaar ah, waxaa la isugu yeerayaa shir guud oo caadi ah (Assemblaa Crdinaria) Lix bilood gudaheeda marka la xiro xisaabta shirkadda.

Qod. 9) Uyeeridda xubnaha ee shirweynaha waxaa lagu sheegayaa warqad Rakomandaata ah oo Rasiid soo noqosho leh, ama hab kasta oo qaddaynaya in warqaddii u yeerista ay gaartay xubintii, ogaysiiskaas oo la doonaaya in la isku gaarsiiyo muddo (8) maalmood gudahood ah, ka hor maalinta isku imaadka.

Qod. 10) Shirweynaha waxaa hogaaminaaya Guddoomi yaha ama cid kale oo shirweynaha lagu magacaabay.

Qod. 11) Shirkadda waxaa maamulaya hal Guddoomiye oo awoodiisu jirayso ilaa uu isticmaalo ka keeno jagada Laga qaado.

Qod. 12) Guddoomiyaha Shirkadda wuxuu awood buux-da u leeyahay inuu fuliyo dhammaan hawlaha shirkadda oo dhan kuna saabsan howlaha caadiga iyo kan caadi dhaafka ah, sida macaamilaadka Bankiyada Hay'adaha Dowladda, Wasaaradaha iyo wixii la mid ah oo dani ugu jirto howlaha Shirkadda.

Qod. 13) Keli maamulaha idman, wuxuu awood u leeya hay inuu saxiixi karo jeegagga, kana soo qaadi karo iyo inuu ku shubi karo xisaabaadka ay leedahay shirkadda, iyo inuu maamuli karo wax alaaye wixii ku saabsan maamulka Lacagta.

Qod. 14) Guddoomiyaha Shirkadda waxaa awood loo siiyay inuu fuliyo wax alla wixii go'aan ay gaarto shirkadda. Sidoo kale Guddoomiyaha wuxuu xaq u leeyahay inuu shir-kadda ka metilo Hay'adaha Sharciga hortooda, una shirkad-da ka daafici karo Maxkamad kasta horteeda, qoreen u qa-ban karo, inuu magaca shirkadda ku sameyn karo heshiisyo iyo gorgortan kasta ee xafiisyada Dowladda iyo kuwa kaleba

Qod. 15) Xiritaanka Xisaabaha Shirkadda wuxuu bilaa bamayaa 1da Jannaayo wuxuuna dhamaanayaa 31ka bisha Disember ee Sanad waliba.

Qod. 16) Guddiga Baarista ee Shirkadda waxaa lagu ma gacaabi doonaa shirka ugu horeeya ee ay yeeshaan saamiley da shirkadda.

Qod. 17) Qaybsiga Faa'iidada iyo khasaaruhuba, waxay u dhigmaan qaybta ay xubin kastaa ku leedahay hantida Shirkadda, Faa'iidada 5% waxana loo dhigayaa keyd guud, 95% soo harteyna waxaa loo qaybinayaa xubnaha shirkada.

Qod. 18) Xubin waliba oo ka mid ah shirkadda waxay wareejin kartaa qaybta ay ku leedahay hantida shirkadda, iyada oo warqad qoraal ah ku ogeysiinaysa xubnaha kale ee Shirkadda, isla markaana la tixgelinaayo haddii uu jiro qof ka mid ah xubnaha oo doonaya in uu iibsado qaybtaas. Haddii muddo 15 maalmood gudaheed laga waayo xubnaha kale cid ka iibsatada, wuxuu xaq u leeyahay in uu ka iibiyo ama uu ku wareejiyo cid alla ciddii uu doono.

Qod. 19) Qufiisi geeriyooda waxa qeybtiisa loo dhaxlisay dii waana in ay la yimaadaan warqad caddaynaysa in ay lee yihiin dhaxalka qofkaasi, waana in ay tahay warqad sharciyaysan.

Qod. 20) Lacagta 3/10-da ah ee la dhigay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, waxa soo qaadaya Guddoomiyaha.

Qod. 21) Dhammaan xubnaha Shirkadani waxa ay si Wadajir ah isugu waafaqeen sidan uu u degsan yahay xeer Gaarkan.

Qod. 22) Wax alla wixii aan xeerkan lagu sheegin ama Qoraalka Dhismaha ee Shirkadda, waxaa loo raacayaa mida uu Sharciga J.D.S. ee u degsan shirkadaha noocaan ah.

1) Maxamed Diiriye Laalac.
2) Maxamuud Jaamac Xasan.
3) Cabdi Maxamuud Cumar.
4) Maxamed Saalax Xuseen.
5) Cali Xaaji Madar.

NOOTAAYAHA
(Dr. Maxamuud Cumar Abati)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Muqtaar Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0342126 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhain Sh. So. 200.000 kuna qoran magaca Jaalle Cawoow Maxamed Nuur sida ku cad warqadda lam. 3161 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0342126 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 200.000 ku qoran magaca Jaalle Cawoow Maxamed Nuur.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir in ay siiso Jaalle Maxamed Muqtaar Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200 000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 83

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Axmed Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY In uu lumay Jeeg War. Lam. 0322852 oo laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed sida ku cad warqadda Lam. 3745;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0322852 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca Maxamed Axmed Yuusuf lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Maxamed Axmed Yuusuf lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 500.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka varayn 15 maalmood laga bilaamo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan ...ay ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 31.3.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 84

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
## GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Ruqiyo Axmed Geyre;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 0646020 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo-maaliyeed Laanta Gaalkacyo kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50.000 ku qoran magaca Jaalle Ruqiyo Axmed Geyre sida ku cad warqadda lam. 3909 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0646020 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaa-lkacyo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 ku qoran magaca Jaalle Ruqiyo Axmed Geyre.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo in ay siiso Jaalle Ruqiyo Axmed Geyre lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa-finta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.4.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 85

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Cumar Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga War. ee hoos ku qoran kalana ah sidatan:-

| J W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|
| 1289462 | 100.000 | C/llaahi | Cumar | Maxamed | Dh/mareeb |
| 1289463 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1289464 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0251487 | 50.000 | « | « | « | » |

oo laga sameeyey Laanta Dhuusa-mareeb ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed sida ku cad warqadda Lr. 4339;

HADDU UARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee lam. kor ku qoran kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh. So. 350.000 kuna qoran magaca Cabdullaahi Cumar Maxamed lagana sameeyey Laanta Dh/mareeb ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Dh/mareeb ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Cabdullaahi Cumar Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 350.000 oo ah bedelkii Jeegagga kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.4.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG
GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. MUDUG

HADDUU ARKAY: Warqadda taariikhdeedu tahay 8.4.89, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo, kuna soo muujiiyeen inuu Jeegga Lam. 0342218, kuna qoran Cabdi Maxamed Cabdi ka lumay, iyadoo Jeeggaasi laga sameeyey Laanta Wadajir ee Muqdisho, kuna qornayd Jeeggaasi lacag dhamayd Sh.So. 190.000 (Boqol iyo Sagaashan Kun);

HADDUU ARKAY: Arjiga codsiga ah ee la qoray 10.4.89, Maxkamaddana uu u soo qortay Jaalle Cali Cabdi Xirsi isagoo codsigiisa ku soo muujiyey inuu ka lumay Jeegga Lambarkiisu kor ku xusan yahay, kuna soo weydiistay Maxkamadda in loo sameeyo warqadda Faafinta Rasmiga ah;

HADDUU ARKAY: Jeegga lumay salkiisa oo leh Lambarka kor ku qoran lana qoray 13.3.1989, kuna qornayd lacagta kor ku xusani;

HADDUU ARKAY: Qodobka 69aad ee Xeer Sharci ahaan Lr. 2 soona baxay 9.9.1965tii;

WUXUU AMRAYAA

In Jaallahaas loogu beddelo Jeeg cusub ee u dhigma kii ka lumay, kadib markii amarkan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda ayna ka soo wareegto muddo (30) maalmood waana in Jeeggaas cusub oo la samayn doono gacanta laga saaraa Jaalle Cali Cabdi Xirsi amase cid wakaalad sharci ah ka haysata.

Gaalkacyo, 11.4.1989

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Yuusuf Xersi Xasan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0073103 oo laga sameeyey Laanta Baraawe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed sida ku cad warqadda lam. 04 kuna jirto Sh.So. 500.000;

HADDUU ARKAY: Qod. 62 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0073103 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca Jaylaani Muunye Qulateen lagana sameeyey Laanta Baraawe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Baraawe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Yuusuf Xersi Xasan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 500.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.4.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)